

## Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota

### Habraaca Weyddiisiga Xogta markay Xogtu Adiga Kugu Saabsan Tahay (Ujeeddada Xogta Shaqsiga)

Xeerarka Minnesota ee §13.025 iyo §13.03 ayaa u baahan dokumentigan.

#### Xogta Adiga Kugu Saabsan

Xeerka Hab-dhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota (Xeer. Minn. §13) wuxuu siinaya shaqsi iyo qolo kasta xuquuqo muhiim ah markay dawladu uruuriso, samayso, oo ay hayso xogta dawladda ku saabsan. Xogta dawladdu waa eray macnaheedu yahay inay dhammaan macluumaadka la diiwangaliyay ee{ut1}Xafiiska Tacliinta Sare (OHE){ut2} u sameeyay, ururiyay, keydiyay, ama u hayo sidii ay u fulin lahaayeen shaqadooda. Dukumintigani wuxuu sharxayaa xuquuqdaada iyo sida aad u isticmaali karto iyaga.

#### Kala qaybinta Xogta Adiga Kugu Saabsan (shaqsi ama qolo ahaan)

Shakhsii waa bini aadamka nool. Xog kasta oo aan dadwaynaha u furnay ee ku saabsan shaqsiga ayaa loo garan doonaa mid gaar ah ama qarsoodi ah. Qolada ayaa noqon karta shirkad, shirkad wayne, xubin meherad, ama nooc ksat ah qolo dano ka leh ah, laakiin ma aha shaqsi. Xog kasta oo aan dadwaynaha u furnay ee ku saabsan qolo ayaa loo garan doonaa mid dadwayne u furnay ama mid aan dadwayne u furnay oo la ilaaliyo.

- **Xogta Dadaynaha:** Sharcigu wuxuu u qaataa in macluumaadka oo dhani ay yihiin kuwa dadweynaha haddii sharciga gobolka ama federaalku ay dhigayaan in xogta aysan ahayn mid dadwayne mooye. OHE waa in ay siisaa xogta guud qof kasta oo weyddiista; kuma xirna qofka weyddiisanaya xogta iyo sababtaba.
- **Xogta Dadaynaha Aan u Furnayn:** Kelmadda wada saamayska leh ee micnaheedu yahay, xog gaar, aan dadawaynaha u furnayn, asturan, aan dadaynaha aan u furnayn oo la ilaaliyo, sida lagu qeexay hoosta.
- **Xogta Gaarka ah/Aan Dadwaynaha u Furanayn:** Xogta gaarka loo leeyahay ee ku saabsan shakhsiyadka; xogta aan dadwaynaha u furnayn ee ku saabsan qolooyinka. OHE ma siin karto xog gaar ah/aan dadwaynaha u furnayn, laakiin marin waad heli kartaa markay xogtu adiga kugu saabsan tahay. Xogta gaar ah/aan dadwaynaha u furnayn ee adiga kugu saabsan ayuu walibana marin u heli karaan qof haysta oggolaansho, shaqaalaha dawladda ama qandaraasleyaasha shaqadooda si macquul ah ugu baahan marin u helka xogta, iyo kuwa kaleba sida uu oggolyahay sharcigu ama amar maxkamadeed.
- **Xogta Asturan/Aan Dadwaynaha u Furnayn ee La Ilaaliyo:** Xogta asturan ayaa ku saabsan shakhsiyadka; xogta aan dadwaynaha u furnayn ee la ilaaliyo ayaa ku saabsan qolooyinka. Xogta asturan/aan dadwaynaha u furnayn ee la ilaaliyo ayaa leh ilaalinta ugu badan ee loogu talagalay shakhsiyadka iyo hay'adaha, kolba siday u kala horreeyaan. Dadwaynaha ama adiguba midkiinna marin uma helin kartaan xitaa markay xogta asturan/aan dadwaynaha u furnayn ee la ilaaliyo ay idinka idinku saabsan tahay. OHE ayaa la wadaagi karta xogta asturan ee adiga kugu saabsan shaqaalaha dawladda ama qandaraasleyaasha ay shaqadoodu ay si macquul ah ugu baahan tahay marin u helitaanka xogta, iyo kuwa kale ee u oggolyahay sharcigu ama amar maxkamadeed.

OHE ayaa ururin karta oo hayn karta xogta kugu saabsan adiga (shaqsi ama qolo) marka ay leedahay ujeeddo shariyeed inay haysato, oo ah OHE inay ku haysato qaab kuu sahlaysa marin u helka. Xogta adiga kugu saabsan waxaa loo kala qaybin karaa ahaan, mid dadwayne, mid gaar ah/aan dadwaynaha u furnayn, ama mid asturan/aan dadwaynaha u furnayn ee la ilaaliyo oo kala kala qaybinta ayaa go'aamisa cidda si sharci ah u arki karta xogta.

#### Xuquuqdaada Hoos Timaad Xeerka Hab-Dhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota

Haddii ay OHE hayso xog adiga kugu saabsan, oo lagaa garan karo xogta, markaa adiga ayaa ah "shaqsiga xogta." OHE ayaa ururin oo hayn karta kaliya xogta ku saabsan shakhsiyadka (qolooyinka) OHE ay ugu baahan tahay inay maamulaan oo ay maareeyaan barnaamijyadeeda. Markaad tahay shaqsiga xogta, waxaad leedahay xuquuqaha soo

socda:

**Marin u helitaanka xogta adiga kugu saabsan:** Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso xog kasta oo dadwaynaha u furan iyo mid gaar ahaaneed oo ay OHE kaa hayso adiga iyada oo aan lacag lagugu dallacin. Wuxuu kale oo aad xaq u leedahay inaad hesho nuqullada xogta dadwaynaha u furan iyo xogta gaarka ah ee adiga kugu saabsan, laakiin Xeerka Hab-Dhaqanka Xogta ayaa noo oggol inaan lacag kuugu dallacno nuqullada. Waad eegi kartaa midkood kasta xogta kahor intaanad weyddiisan nuqlul. Haddii aad weyddiisato, OHE ayaa kuu sheegi doonta haddii ay hayso xog adiga kugu saabsan iyo haddii xogtu ay tahay mid dadawayne u furan, mid gaar ah, ama ay asturan tahay.

- Waalid ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso oo aad hesho nuqullada xogta dadwaynaha u furan iyo xogta gaarka ah ee ku saabsan carruurtaada da'doodu ka yar tahay 18 sano. Markaad tahay mas'uulka sharci ahaan loo magacaabay, waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso oo aad hesho nuqullada xogta dadwaynaha u furan iyo xogta gaarka ah ee ku saabsan shaqsiga laguugu magacaabay mas'uulka ahaanta.
- Carruurta ka yar da'da 18 ayaa xaq u leh inay weyddiistaan OHE inaysan siinin xogta khaaska ah ee iyaga ku saabsan waalidkood ama mas'uulkooda. Marka la sameynayo weydiisi noocan ah, cunugga ka yar da'da 18 waa inay ku sameeyaan weyddiisadka qoraal ahaan oo ay raaciyaan sababaha ay OHE u diidi karto waalidiinta ama mas'uuliyiinta cunuggu inay helaan xogta. Cunuggu waa inuu ugu soo diraa weyddiisigan Sarkaalka Adeecidda Hab-Dhaqanka Xogta iimayl ahaan, faakis, ama iimayl isla maclumaadka kula xiriirka ku qoran qaybta la xiriirrada. OHE ayaa gaari doonta go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan weyddiisiga cunugga iyada oo lagu saleynayo danaha ugu wanaagsan ee cunugga.
- Dadka qaangaarka ah ee leh mus'uulka sharci ee loo magacaabay ayaa xaq u leh inay weyddiistaan OHE inaysan siinin mas'uulkooda xogta gaarka ah ee ku saabsan iyaga. Marka la sameeyo weyddiisiga sidaas ah, shaqsiga xogtu waa inay ku sameeyaan weyddiisiga qoraal ahaan oo ay raaciyaan sababaha ay OHE aya tahay inay u diiddo karto mas'uulka sharciga loo magacaabay inuu marin u helo helo xogta. Shaqsiga xogtu waa inuu ugu soo diraa weyddiisigan Sarkaalka Adeecidda Hab-Dhaqanka Xogta boosto ahaan, faakis, ama iimayl isla maclumaadka kula xiriirka ku qoran qaybta la xiriirrada. OHE ayaa gaari doonta go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan weyddiisiga shaqsiga ee xogta iyada oo lagu saleynayo danaha ugu wanaagsan ee shaqsiga.

**Markay OHE ay xog kaa ururiso adiga:** Markay OHE ku weyddiisato inaad siiso xog gaar ah ama asturan ah oo kugu saabsan adiga, OHE waa inay ku siisaa ogeysiis ku saabsan hab-dhaqankayaga asturnaanta. Ogeysiiska ayaa kuu sifaynaya waxay OHE ku samayo xogta ay kaa ururiso. Caadi ahaan, OHE ayaa isticmaali u karta oo u siidyn karta xogta kaliya siyaabaha lagu sifeeyay ogeysiiska. OHE waxay ku weyddiisan doontaa ogolaanshahaaga qoraalka ah haddii loo baahdo in la adeegsado ama lagu sii daayo maclumaadka khaaska ah ee kugu saabsan qaab ka duwan, ama haddii aad weydiisato OHE inuu u sii daayo xogta qof kale. Oggolaanshahan waxa loo yaqaan oggolaansho warqab.

**Ilaalinta xogta adiga kugu saabsan:** Xeerka Ku-Dhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota ayaa u baahan inay OHE inay ilaaliyo xogta gaarka kuu ah iyo asturnaantaada markaad shaqsiga xogta ku saabsan tahay. OHE ayaa dejisay ilaalinta ku habboon sidii loo hubin lahaa inay xogtaadu ay ammaan ahaato. Nasiib-darrose haddii ay dhacdo inay OHE ogaato in amni ku xadgudub dhacay oo qof aan loo oggolayni u mrin u helay xogta gaarka ah ama asturan ee adiga kugu saaban, OHE ayaa kuugu soo wargalin doonta siduu sharcigu u baahn yahay.

**Marka xogta kugu saabsani aysan sax ahayn iyo/ama aysan dhammaystirnayn:** Waxaad xaq u leedahay inaad ka timaad sax ahaanta iyo/ama dhammaystirnaanta xogta dadwaynaha u furan iyo ta gaarka ah ee adiga kugu saabsan. Wuxuu kale oo xaq u leedahay xaqaa inaad rafcaan ka qaadato go'aankayga adiga oo raaca habraaca lagu qeexay xeerka Minn. Stat. §13.04 qayb-hoosaad. 4. Haddii aad tahay cunug ka yar da'da 18, waalidkaaga ama mas'uulkaaga ayaa xaq u leh inay ka hor yimaaddiin xogta adiga kugu ku saabsan.

## Sida Loo Sameeyo Weyddiisadka Xogta Adiga Kugu Saabsan

Si aad u fiiriso xogta ama aad u weyddiisato nuqlulada xogta OHE ay hayso, carruurtaada ka yar da'da 18, ama shaqsiga mas'uulinimada laguugu magacaabay, ayaa ku aaddinaya weyddiisigaaga U Qaabbilsanaha Hab-dhaqanka Xogta aagga mowduuca aad aamminsantahay xogta adiga ku saabsani inay ku kaydsan tahay. Liistada Qaybaha OHE iyo u qaabbilsanaha qaybtaas ayaa ku qoran dhammaadka ujeeddadan. **Waa inaad ku sameysaa weyddiisigaaga xogta qoraal ahaan.** Iimaylka ayaa la mid ah weyddiisiga qoraalka ah.

Waxaad isticmaali kartaa foomka weyddisiga xogta ee ku lifaaqan dokumentigan, laakiin waajib kuguma aha inaad isticmaasho foomka. Haddaad doorbiddo inaadan isticmaalin foomka weyddiisiga xogta, weyddiisigaaga waa inay ku jirtaa:

- Inaad weyddiisiga ku samaynayo sida uu dhigayo Xeerka Ku-Dhaqanka Xogta (xeerka Minn. Stat. §13), markaa atahay shaqsiga xogta leh, ee loogu talagalay xoga adiga kugu saabsan.
- Sifayn bayaan ah oo ku saabsan xogta aad rabto.
- Haddii aad jeceshahay inaad fiiriso xogta, ama aad ka haysato nuullo xogta, ama labadaba.
- Macluumaadka lagugu garan karo ee caddaynaya inaad tahay shaqsiga xogta leh, ama waalidka/mas'uulka sharci ahaan loo magacaabay ee shaqsiga xogta leh haddii aad codsaneysyo xog gaar ah/aan dadwaynaha u furnayn.

OHE waxay u baahan tahay caddayn aqoonsigaaga kahor intana ka jawaabin weyddiisigaaga xogta gaarka ah. Mid ka mid ah kuwa soo socda ayaa noqon kara caddayn aqoonsi: liisnka darawalka gobolka, kaarka aqoonsiga militariga, baasaboorka waddankaaga, kaarka baasaboorka waddankaaga, kaarka aqoonsiga gobolka/kaarka aqoonisga qowmiyadaha qabiileed ama (kaliya carruurta 18 sano ka yar). kaarka aqoonsiga dugsiga. Loogu talagalay waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah ee loo magacaabay ilmaha ka yar da'da 18, kaar aqoonsi sawir leh oo sharci ah (oo la mid ah nooca kor lagu qoray) iyo nuql la xaqiijiyay oo ah shahaadada dhalashada ilmaha, ama nuql sharciyeysan oo ah dokumenti caddaynya waalidka ama xiriirka mas'uulnimada lalla leeyahay ilmaha (tusaale ahaan amar maxkamadeed, qandaraas daryeel korin, ama caddaynta waalidnimada). Markay tahay daryeelaha sharciga ah ee qaangaarka, kaar aqoonsi sawir oo sharci ah (oo la mid ah kuwa kor lagu qoray) iyo nuql la xaqiijiyay oo ah dukumiinti ballan ah ilaaliye (tusaale amar maxkamadeed ama awood qareen).

## Sidee ayay OHE uga Jawaabtaa Weyddiisiga Xogta

Markaad sameysyo weyddiisikaaga, U Qaabbilsanaha ayaa kaagaga soo jawaabi doona labo maalmo shaqo gudahood isaga ama iyada oo qirta in la helay weyddiisadkaagi oo loo fiiranay. Jawaabtu waxa laguugu soo diri doonaa isla qaabkii wada xiriir ee aad ku soo dirtay weyddiisiga, haddii habab kale oo lagu wada xiriiro aad ku sheegto weyddiisigaaga mooye. Haddii OHE ay kugu heli weydo habkii kula soo xiriirkaagii aad weyddiisiga ku sameysay, oo aadan bixin macluumaad kale oo lagugula soo xiriiro, OHE ayaa tixgelin doonta in weydiisigaaga xogta faraha laga qaado. Haddii aadan jawaab ku helin labo maalmood gudahood, kala xiriir Sarkaalka Adeecidda Hab-dhaqannada Xogta 651-642-0567, riix 9 kaddibna 0.

- Haddii aysan ku kala caddayn xogta aad weyddiisanayso, OHE ayaa ku weyddiisan doonta inaad sifeysyo.
  - Haddii OHE aysan haynin xogta, OHE ayaa kugu soo wargalin doonta 10 maalmood gudahood.
  - Haddii OHE ay hayso xogta, laakiin xogtu ay tahay xog asturan oo adiga kugu saabsan ama xog asturan/xog gaar ah oo ku saabsan qof kale, OHE ayaa kugu soo ogaysiin doonta 10 maalmo shaqo gudahooda.
- Jawaabteeda, ayay OHE ku sheegi doonta xeerka gaarka ah ee sheegaysa in aadan marin u heli karin xogta.

- Haddii OHE ay hayso xogta, oo xogtu ay tahay xogu furan dawaynaha ama xogta gaarka ah ee adiga kugu saabsan, OHE ayaa kaga jawaabi doonta weyddiisigaaga 10 maalmo shaqo gudahoods.
- Haddii xogta lagu jawaabayo u muggeedu sarrayso, OHE ayaa laga yaabaa inay shaaca uga qaaddo xogta si muddooyin isku daba xiga ah illaa jawaabta la dhammaystirayo.
- OHE ayaa uga jawaabi doonta weyddisadkaaga iyaga oo sameeya mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:
  - Inay kuu qabtaan ballan taarikh, iyo wakhti, iyo goob aad ku fiiriso xogta, lacag la'aan, ama
  - Inay kugu siyyaan nuquallada xogta 10 maalmo shaqo gudahood. Iyada oo la raacayo qaybta qiimaha nuquinka, ee hoosta ku taal, OHE ayaa kuu soo diri karta weyddiisi loogu talagalay deebaajiga laga qaado wadarta qiimaha la qiyaasay ee nuqullada. Haddii aadan kaga soo jawaabin weyddiisiga deebaajiga 10 maalmo shaqo gudahood, OHE ayaa tixgelin doonta in weydiisiga xogta faraha laga qaado. Waad dooran kartaa inaad soo qaadato nuqulladaada ama OHE ayaa boostada kuugu soo diri doonta nuqullada. OHE ayaa ku siin doonta nuqlo elektiroonig ah markaad la weyddiisto haddii OHE ay xogta ku hayso qaab elektiroonig ah.

Kaddib markay OHE marin kuu siiso helitaanka xogtaada, OHE ma aha inay ku tusto xogta mar labaad muddo lix bilood ah ilaa uu khilaaf jiro ama OHE soo ururiso ama abuurto xog cusub oo adiga kugu saabsan. Xeerka Hab-Dhaqanka Xogtu ugama baahna OHE inay abuuto ama ururiso xog cusub iyada oo looga jawaabayo weyddiisi xog haddii OHE aysan horeyba u haynin xogta, ama ay kugu siiso xogta qaab ama habayn gaar ah haddii OHE aysan hayn xogta qaabkaas ama habayntaas. Haddii OHE ay oggolaato in la abuuro xog ka jawaabeysa weyddiisigaaga, waxay kaala shaqayn doontaa sifaynta weyddiisigaaga, oo ay ka mid yihiin qiimaha iyo waqtiga jawaab celinta.

Waxaad u samayn kartaa weyddiisiyadyo muddada dheer qaata xogta adiga kugu saabsan. Weyddiisyada muddada dheer qaata ayaa ah weyddiisyoo loogu talagalay xog oo u baahan kara jawaabcelinno muddo dheer qaata. Weyddiisyada muddada dheer qaata aya dhaca seddex bilood kaddib, oo wixii khidmado ah ee lagaa rabo waa in loo bixiyaa si buuxda dhammaadka muddada saddexda bilood ah iyo kahor cusboonaysiinta weyddiisiga muddada qaata.

#### **Qiimaha Nuqullada loogu talagaly Xogta Shaqsiyaadka**

OHE waxa laga yaabaa inay kugu soo dallacdo qiimaha dhabta ah ee sameynta nuqullada xogta adiga kugu saabsan. Markay go'aaminayso qiimaha dhabta ah, OHE ayaa raacisa waqtiga- shaqaalaha kaga baxa inuu sameeyo oo u diro nuqullada, qiimaha waxyaabaha aan ku dul nuqulaynayo xogta (warqad, CD, DVD, iwm.), iyo qiimayaasha boosta ku dirista. sida tigidhada boostada (haddii ay jiraan). Qiimaha waqtiga shaqaalaha waxa lagu xisaabiyyaa iyada oo la adeegsanayo mushaharka saacadlahaa ah ee shaqaalaha ugu mushaharka yar inuu dhammaystiro hawsha, oo lagu daro 20% oo dheefaha kaabka ah. Wixii ku soo dallacyo ah waa in la bixiyaa ka hor intayna OHE nuqulayn dokumentiyada ama intaan lagu siin.

- OHE lacag kuma dallacdo nuqullada haddii u qiimaha lagu qiyaaso inuu ka yar yahay \$10.00.
- OHE lacag kuguma dallacayso inay fiirso xogta ama inay kala saarto xogta dadwaynaha u furan iyo kuwa aan u furnayn.
- Markay xogtu tahay xog ku saabsan shaqsiga OHE lacag uguma dallacdo wakhtiga ay qaadato baaritaanka iyo soo saarista.

## **Macluumaadka kula Xiriirka Xogta Hab-Dhaqanka**

**Ugu soo dir wixii xog weyddiisi ah:**

Boostada:

[Gali cinwaanka xilka u-qabbilsanaha weyddiisiga xogta, hoosta]

1450 Energy Park Drive, Suite 350

St. Paul, MN 55108-5227

Faakis: 651-642-0675, aad ku hagaaji U-qabbilsanaha ku habboon, ee hoosta ku taal "Data Request – public" bogga jaldiga

**Ugu soo dir iimayl leh "Data Request – public" sadarka mawduuca [datarequest.ohe@state.mn.us](mailto:datarequest.ohe@state.mn.us)**

### **Madaxa Mas'uulka ah**

Guddoomiye

### **Sarkaalka Adeecidda Hab-dhaqannada Xogta**

Kuxigeenka Guddoomiyaha

### **Wakiillada Hab-Dhaqannada Xogta**

- Maareeyaha Isgaarsiinta
- Maareeyaha Kaalmo Lacageed – Deeqaha
- Maareeyaha Kaalmo Lacageed – Amaaho
- Maareeyaha Cilmi Baarista iyo Ujeeddooyinka
- Maareeyaha Diiwaangelinta Hay'adaha Gaarka ah iyo Liisan Siinta
- Maareeyaha Hanti-dhowrka
- Maareeyaha Shaqada iyo Shaqaalahaa
- Maareeyaha Deeqaha Tartanka Leh, Deeqaha Sharci Ahaan Loogu Magacaabay, iyo Xiriirada Dawladda
- Maareeyaha Get Ready!
- Maareeyaha Xisaabinta

**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**

**Foomka Weyddiisiga Shaqsiga ama Qolada Xogta Leh**

<b>Magaca:</b>	<b>Taariikhda:</b>	
<b>Cinwaanka:</b>		
<b>Magaalo:</b>	<b>Gobol:</b>	<b>Sib koodh:</b>
<b>Telefoon Lambar:</b>	<b>Limayl:</b>	
<b>U Qaabbilsane:</b>		

Fiiro gaar ah: Waajib kuguma aha inaad bixiso macluumaadka korka ku yaal. Hase yeeshe, OHE ma karto inay xaqiijiso qofkaad athay si ay kuu siiso macluumaad kasta oo gaar ah iyada oo aan la haysan macluumaadka kula xirirka ama qaabka aqoonsiga loo baahan yahay.

Fadlan ku sifee xogta aad weyddiisanayso sanduuqa hoosta ku yaal ee aad rabto inay OHE ku siiso:

Baaritaan       Nuquollo       Baaritaan iyo Nuquollo labadaba

MS § 13.03, qodob-hoosaad. 3, ayaa awood u siinaysa OHE inay ku soo dalacaan khidmado si ay u soo ceshadaan kharashaadka ay galeen si ay u bixiyaan nuqulada xogta. Lacag sii-bixin ayaa loo baahan yahay kahor helitaanka nuqullandada xogta.